# Waa maxay qiimaha igaga bixi doona xubinimada Unite? JANNAAYO 2020

Unite the UNION

## QAYBTA

### SARE

**Dalabka Lam. 1aad**

Dadka intooda ugu badan ayaa tan doorta maadaama ay ku jirto badbaadinta qiime leh ee adiga iyo qoyskaaga.

**Waqti Buuxa:** £3.75 hal/tod ama £16.25 hal/bil

**Waqti kooban:** £2.18 hal/tod ama £9.45 hal/bil (ilaa 21 saacadood hal/tod)

**Mushaar Yar*:** £2.45 hal/tod ama £10.62 hal/bil

**Tababbarte:**

| | |
|---|---|
| £1.05 hal/tod ama £4.55 hal/bil | (sanad 1) |
| £1.77 hal/tod ama £7.67 hal/bil | (sanad 2) |
| £2.43 hal/tod ama £10.53 hal/bil | (sanad 3) |
| £3.10 hal/tod ama £13.43 hal/bil | (sanad 4) |

### AASAASI

Xaq ugu leedahay dheefaha ururka shaqaalaha ee daruuriga ah. Badbaadin dheeraad ah kuma jirto.

**Waqti Buuxa:** £3.45 hal/tod ama £14.95 hal/bil

**Waqti kooban:** £2.03 hal/tod ama £8.80 hal/bil (ilaa 21 saacadood hal/tod)

**Mushaar Yar*:** £2.15 hal/tod ama £9.32 hal/bil

**Tababbarte:**

| | |
|---|---|
| £0.75 hal/tod ama £3.25 hal/bil | (sanad 1) |
| £1.47 hal/tod ama £6.37 hal/bil | (sanad 2) |
| £2.13 hal/tod ama £9.23 hal/bil | (sanad 3) |
| £2.80 hal/tod ama £12.13 hal/bil | (sanad 4) |

### SICIRRADA GAARKA AH

Xubinimada bulshada, waxbarashada waqti buuxa, xubnaha hawlgabay siyaado iyo dib ugu noqoshada shaqada.

£0.55 hal/tod ama £2.38 hal/bil

## DHEEFTA

| | SARE | AASAASI | SICIRRADA GAARKA AH |
|---|---|---|---|
| Adeegyada sharciyeed ee ururka Unite | ✓ | ✓ | ✓ |
| Qatka Caawinaada Sharciga | ✓ | ✓ | ✓ |
| Dheefta muranka ama ka xiridda £50 maalintiiba | ✓ | ✓ | ✓ |
| Huteelka The View Hotel Eastbourne oo qiimo jaban lagu joogayo | ✓ | ✓ | ✓ |
| Dheefta aaska ilaa £1,000 (Sare) ama ilaa £500 (Sicirrada aasaasi iyo gaar ah) | ✓ | ✓ | |
| Dheefta shilka lagu dhinto ilaa £50,000 £10,000 Xubnaha aasaasiga ah | ✓ | ✓ | |
| Dheefta tabardarrada ilaa £25 toddobaadkii muddo ilaa 51 toddobaad ah | ✓ | | |
| Dheefta dhalmada iyo korsashada £10 toddobaadkii muddo ilaa 39 toddobaad ah | ✓ | | |
| Dheefta aabbenimada £15 toddobaadkii muddo ilaa 2 toddobaad ah | ✓ | | |
| Dheefta naafada joogtada ah ee ka timaadda shil ilaa £25,000 | ✓ | | |
| Dheefta addinka/isha/farta luma ee ka timaadda shil ilaa £10,000 | ✓ | | |
| Bogsasho ilaa 2 toddobaad lagu joogo huteelka The View Hotel Eastbourne (ku xaddidan hal booqasho 24kii bilood) | ✓ | | |

**Fadlan Ogsoonow:** Haddii aad ugu soo biirto sicirka rukumashada Waqti Kooban dheefaha waxaa laga yareyn doonaa boqolkiiba 50. Dhammaan dheefaha shuruudo ayay leeyihiin.

***Sicirka mushaarka hooseeya:** loogu talagalay xubnaha qaata wax ka yar Mushaarka Lagu noolaado (Living Wage) (£9.00 hal/saac London dibaddeeda, £10.55 hal/saac London gudaheeda) iyo wax ka yar £350 saafi ah hal/tod. Ama xubnaha qaata wax ka yar £18,000 hal/san.

**OLOLAHA SIYAASADEED** Ururka Unite waxuu u doodaa danaha xubnahayaga annagoo olole siyaasadeed iyo shaqeed ka qaadna arrimaha adiga ku saameeya – laga bilaabo mushaarka, lacagaha hawlgabka, iyo xuquuqda kale ee goobta shaqada ilaa guryeynta, arrimaha sinnaanta iyo adeeggeena NHS (Adeegga Caafimaadka Qaran). Haddii aad rabto in aad tan ka qayb noqoto, qiimaheedu waa 10 bii toddobaadkii uun oo lagu daro sicirrada kor ku xusan.

**DRIVER CARE (DARYEELKA DARAWALKA)** waxaa lagu bixiyaa caymis si gaar ah kuugu toosan haddii laysinkaaga baabuur wadista si joogto ah lagaaga celiyo ama lagaaga buriyo sababtoo ah dhaawac, naafo, jirro ama cudur arag xun ama weerar. Waxaa weliba ku jira Caymiska Shilka Shakhsi ahaaneed iyo Weerarka.

**Driver Care (Daryeelka Darawalka)**
**£1.10 keliya oo siyaado ah toddobaadkii**

# UJEEDDADAYADA waxay tahay in aan adiga kuu helno qodobbada iyo shuruudaha ugu fiican ee adeegga, oo aan talo iyo taageero kaa siinno, arrin kaste, oo aad u baahato ee ku xiran shaqadaada.

**Dheefaha Sharciyeed iyo kuwa Soo raaca ee ururka Unite**

Marka aad xubin ka noqoto ururka Unite waxaad heli kartaa dheefo iyo adeegyo aad u kaladuwan.

- Adeegyada Sharciyeed ee ururka Unite
- Caymiska Nolosha ee ururka Unite
- Deymaha guryaha ee ururka Unite
- Kaarka Jarista ee Lacag lagu sii shubo ee ururka Unite
- Caymiska Guriga ee ururka Unite
- Caymiska Baabuurta ee ururka Unite
- Bakhtiyaa nasiibka ururka Unite
- Dib u eegista Maaliyadda Shakhsi ahaaneed ee ururka Unite
- Driver Care (Daryeelka Darawalka)
- Adeegga Ururka Deymaha ee ururka Unite
- Adeegyada Guriga ee ururka Unite

## ADEEGYADA SHARCIYEED EE URURKA UNITE

**Sababaha ugu muhiimsan ee ururka Unite loogu soo biiro waxaa ka mid ah helitaanka adeegyo sharciyeed oo tayo leh. Waxaan annagu aaminsan nahay in noocyada iyo tayada adeegyada ay looyarradayadu bixiyaan uu yahay midka ugu fiican ee ay Ingiriiska ka heli karaan xubnaha ururka shaqaaluhu, oo intooda ugu badan waa bilaash. Waxaa kuwan ka mid ah:**

- **Talada Shaqada – hubi in shaqada lagaa matalo ama wakiil lagaaga noqdo**
- **Dhaawaca Shakhsi ahaaneed – waxaad haysanaysaa boqolkiiba 100 magdhawga la bixiyo**
- **Khadka Caawinta sharciga – talada ku saabsan arrin kastoo sharciyeed**
- **Dardaaran Bilaash ah – la heli karo ka dib marka 13 toddobaad xubin la ahaado**
- **Kala wareejinta milkiyadda ee Qiime Jaban – lacag laguugu reebayo**
- **Dayacaadda Bukaanka – talo khabiireed iyo matalaad ama wakiilnimo**

## ADEEGYADA SOO RAACA

**Ahmiyadda badan ee ay xubinimada ururka Unite leedahay waxaa qayb ahaan sabab u ah dheefaha iyo adeegyada kaladuwan ee aan ugu soo xaajoonnay magaca xubnahayaga. Sababtoo ah qiyaasta ururka Unite, waxaa suurogal noo ah in aan shuruudo gaar ah, gooni ah kala heshiinno shirkadaha hormoodka ah taasoo lacag farabadan u reebi karta xubnaha ururka Unite. Dhab ahaan xubnaha isticmaala badeecooyinkan iyo adeegyadani waxa ay si fudud ugu reeban karaan caddad ka badan lacagta rukumashada ee ay sanad walba siiyaan ururka Unite.**

**Badeecooyin cusub ayaa marwalba lagu daraa alaabta diyaarka ah markaa hubi in aad booqato bartayada internetka si aad u fiiriso waxa diyaar ah.**

**www.unitetheunion.org**

---

**OGAYSIINTA SIRTA**

Si aad faahfaahin uga hesho habka uu ururka Unite uga shaqayn doono xogtaada fadlan fiiri ogaysiinta ku saabsan sirta ee ugu cusub ee ururka Unite the union oo aad ka helayso halkan http://www.unitetheunion.org/privacypolicy ama la xiriir xafiiska gobolkaaga si aad nuqul uga hesho.

DP/8288/10-19 (UK)